

Waxaa jira kaalmayn, talo, iyo macluumaad laga helli karo dhamaan dawlad goboleedyada iyo territoriska wixii la xiriira gudniinka. Arag hoos meelaha lagala xiriirayo adeega kuugu dhow:



**Northern Territory**  
Kirsten Thompson  
Nurse (Kalkaalisada)  
Family Planning & Welfare  
T: 08 8948 0144  
kirsten.thompson@fpwnt.com.au

**Queensland**  
Odette Tewfik  
Multicultural Women's Health  
Project Coordinator  
(Xiriiriyaha Mashruuca caafimaadka  
Dumarka ee Dadka Dhaqamada-kala duwan)  
True  
T: 07 3250 0250  
odette.tewfik@true.org.au

**New South Wales**  
Linda George  
Senior Health  
Education Officer  
(Sarkaalka Sarre ee  
Barashada Caafimaadka)  
NSW Education  
Program on FGM  
T: 02 9840 3910  
linda.george@health.nsw.gov.au

**Western Australia**  
Carol Kaplanian  
FGM & FDV Research  
Project Officer  
(Sarkaalka Mashruuca)  
Women and Newborn  
Health Service  
T: 08 9340 1557  
carol.kaplania@health.wa.gov.au

**South Australia**  
Kim Voss  
Social Worker  
(Assistante sociale)  
Women's Health Central  
T: 08 8444 0700  
kim.voss@health.sa.gov.au

**Tasmania**  
Xavier Lane-Mullins  
Community  
Development Worker  
(Shaqaalaha Horumarinta Bulshada)  
T: 03 6235 6001  
xlanemullins@redcross.org.au

**Victoria**  
Medina Idriess  
FARREP Worker  
(Shaqaalaha FARREP)  
Royal Women's Hospital  
T: 03 8345 3058  
Farrep.program@thewomens.org.au

**ACT**  
Esther Lam  
CALD Liaison Nurse  
(U-qaybsanaha Kalkaalisada  
Caafimaadka ee CALD)  
ACT Health  
T: 02 6205 1078  
esther.lam@act.gov.au

Mashruuca NETFA waxaa wada Xarunta Dhaqamada kala duwan ee Caafimaadka Dumarka waxaana kharajkiisa bixiya Xukuumada Dhexe. Macluumaad intaas ka badan booqo [www.NETFA.com.au](http://www.NETFA.com.au) ama nagula soco xiriiri [@EndFGM\\_NETFA](https://twitter.com/EndFGM_NETFA).

Dib-u-sixid ugu dambaysay: July 2016

Somali



# Gudniinka Dumarka

Gudniinka Dumarku waa dhaqan caadaad soo jireen ah. Waa goyn ula kac ah oo la goynayo xubnaha dibada ama bedelida unugyada dibada ah ee taranka la xiriira. Gudniinka dumarka waxaa mararka qaarkood loogu yeeraa Goynata Xubinta-la-xiriirta Taranka dumarka ama dhaawicida/Goynata Xubinta Taranka ee Dumarka.

Gudniinka dumarku faaiido uma leh caafimaad dumarka wuxuuna saamayn xun ku yeellan karaa galmoodka iyo xubnaha taranka caafimaadka.

Si aan u xafidno mas'uulna uga ahaano jirkeena, waxaan dhamaanteen u baahanahay in la qadariyo sharafteena oo nala ixtiraamo. Tani waa xuquuqda qof walba oo aadami ah. Waxaa jira kaalmo, talo iyo macluumaad laga helli karo dhamaan Dawlad Goboleedyada iyo Territoriska oo la xiriira gudniinka dumarka.

## Arrimaha caafimaadka

Gudniinka dumarku wuxuu keenaa dhibaatooyin caafimaad oo muddo dheer ah mid gaaban:


- Xanuun aad u daran
- Qandho
- Nabar ama kaar
- Nabaro ama haaro ku samaysma neerfayaasha
- Infakshanka kaadimareenka iyo kaadi haysta
- Xanuun markaad kaadshayso
- Xanuunka waqtiga galmoodka iyo caadada
- Infakshanka kaadimareenka
- Dhibaatooyinka ilma dhalida, sida go'itaanka barta u dhexaysa futada iyo siilka ka dib marka la gijiyo furitaanka siilka iyo haarta
- Dhimasho.

## Xuquuqda Aadanaha

Gudniinka dumarka waxaa loo aqoonsaday xadgudub xuquuqda aadamiga oo gabdhaha iyo dumarka.



## Xaggee Dumarka lagu Guddaa?



Qiyaas dhan 200 milyan oo dumar ama gabdho ah ayaa adduunka dactaladiisa lagu guddaa. Falalka Gudniinka waxaa lagu sameeya bulshooyin iyo qawmiyado ku kala nool Afrika, Barriga Dhexe, Asiya iyo South America waxaana ka mid ah:

Benin	Masar	Liberiya	Soomaaliya
Burkina faso	Eritariya	Malaysiya	Siri Lanka
Kameron	Itoobiya	Maali	State of Palestine and Israel
Jamhuuriyada Afrikada Dhexe	Gambiya	Mauritaniya	Suudaan
Jaad	Ghana	Nijar	Tansaniya
Kolombiya	Guinea	Nayjeeriya	Togo
Cote D'Ivoire	Guinea-Bissau	Cumaan	Yuganda
Democratic Republic of Koongo	Indiya	Baakistan	United Arab Emirates
Jibouti	Indonesiya	Biiru	Yemen
Ekwador	Iraan	Senegal	Saambiya
	Iraq	Sierra Leone	
	Kenya	Singabuur	

Asalka gudniinka lama yaqaan lama xiriiri diinta. Noocyada gudniinku waa kala duwan yahay qawmiyadaha dhexdooda. Wadamada adduunka ka jiraa waa iska daayeen dhaqankaan waxayna ka dhigeen sharci daro. Waa muhiim in aan ka hadalo wixii ku saabsan dhaqan raaca. Waan jecelnahay dhaqankeena laakiin waxaan awoodnaa in aan ka tagno haysashada dhaqan keeni kara khatar.

## 4ta Nooc ee Gudniinka Dumarka

**Nooca 1aad** waa goynta guud ahaan ama qayb ka mid ah kintirka (qayb yar, xasaasiyad leh oo ah qayb ka mid ah qaybaha taranka) ama daboolka kintirka (laabka maqaarka ku wareegsan kintirka).

**Nooca 2aad** waa goynta dhamaan ama qayb ka mid ah kintirka iyo dibnaha yaryar (dibnaha yaryar ee daboolka siilka) iyada oo la goynayo ama aan la goyn dibnaha waaweyn (laababka dibnaha waaweyn ee daboolka qaybta taranka ee dumarka).

**Nooca 3aad** ama baabi'inta (fircooniga ah) waana goynta dhamaan ama qayb ka mid ah dibnaha yaryar iyo dibnaha waaweyn iyada oo la isku tolayo siilka taas oo reebayo dalool yar oo kaadida iyo caadadu ka yimaadaan. Qalinka noocaan saddexaad ah waxaa la samayn karaa iyada oo la goynayo am aan la goyn kintirka.

**Nooca 4aad** ama midka sunnada ah waxaana ka mid ah qaliin kasta oo aan ahayn mid daaweyn la xiriira oo lagu samaynayo xubinta taranka ee dumarka waxaana ka mid ah daloolin, mudid, jarid, xoqid, dheerayn iyo gubida xubinta taranka.

Waxaa la qiyaasay in nooca 3aad ama baabi'antu u yahay 10% dadka la gudooyee adduunka. Waxaa lagu sameeyey gudniinka noocaan ah waxay la hadli karaan dhakhtarkooda si uu u furo ama waxay tegi karaan dhakhtarka. In kasta oo noocyada 1, 2, iyo 4 aanay aad u darnayn weli waxay ku yeellan karaan saamayn samaqabka iyo caafimaadka.

## Gudniinka Dumarku waa sharci daro Australia gudaheeda

Waxay ka soo horjeedaa sharciga in:

- La gooyo ama laga saaro qayb ka mid ah qaybta taranka
- La tolo ama dib-u-tolida lagu sameeyo qaybta taranka dumarka
- La yareeyo furitaanka siilka
- La jaro ama la saro kintirka
- La dhaawaco ama loo geysto dhaawac xubnaha taranka dumarka

Sharcigu wuxuu mamnuucayaa in:

- La gooyo dumar, ama gabar ka yar 18 sanadood
  - Qof laga kaxeeyo Australia si loo soo gudo/gooyo
  - In la caawimo in uu qof u geeyo Australia dibadeeda si loo soo gooyo/gudo
- Qofku sharciga ayuu jebinayaa haddii uu:
- Sameeyo qaliin
  - Ka caawimo qaliin
  - Soo hello qof sameeya qaliinka

**Gudniinka dumarku wuxuu sababaa ciqaab dhan 21 sanadood oo xarig ah.**